# 4

# Sharciga Qoyska iyo Kan Dambiyada

SOM 04

XEERKA QOYSKA EE HAWEENKA GUDAHA ONTARIO

## Haweenka oo dhan. Xeerka Qoyska waa mid.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

# Sharciga Qoyska iyo Kan Dambiyada

*Buugyarahan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga ah. Ma aha bedel talada sharci ee qof iyo gargaar. Haddii aad la tacaalayso arrimaha sharciga qoyska, waxaa lagula talinayaa in aad hesho talo sharci sida ugu dhakhsaha badan si aad u fahamto fursadaha aad leedahay iyo inaad ilaaliso xuquuqda aad leedahay. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lacagtiisana aad u bixib lahayd fiiri buugyarahayaga "Helitaanka macaawimo ee dhibaatada xeerka qoyska". Waxa kale oo laga yaabaa in aad dooneyso in aad aragto aqoonisweydaarsi internetka ee webinar "Raadinta Garyaqaanka Sharciga Qoyska", "Markii dembi dagaal guriga ka dhacay dartiis lagugu soo oogo - Waxaad Filan Kartid", iyo sharciga kale ee qoyska iyo mawduucyada la xiriira sharciga dembiyada. Dhammaan macluumaadkan waxay ku qoran yihiin bogga internetka ee www.onefamilylaw.ca.*

Waxaa jira noocyo badan oo ah waxyeeleynta haweenka. Waxyeeleynta waxaa ka mid ah jirdil, galmo, niyad jabin, iyo dhaqaale. Waxyeeleyntu waa marka qof uu u isticmaalo awoodda iyo xukumid ee qofka dhibbanaha ah. Haddii aad la kulantay waxyeeleyn, ma aha qalad aad adiga gashay, adiguna ma keenin.

## Waa maxay noocyada kala duwan ee xadgudub ah ee dambiga ah?

Canada gudaheeda, noocyo ka mid ah waxyeelentu sharciga ayey ka soo horjeedaan, waxaana ka mid ah:

- Gacan u qaadis qoyska ama lammaanaha
- Waxyeeleyn u galmood
- Dabagal

Haweenka ayaa inta badan ah dhibbanayaasha dambiyadan la kulma. Qofka xadgudubka geysta sida caadiga ah waa qof dhibanaha ogyahay. **Qofka haweenka ah waxay halis weyn waxyeeleyn ugu jiraan waqtiga burburka xiriirka iyo kala tagga**.

**Gacan u qaadistu** waa marka qof u si ula kac ah u qof kale xoog waxyeello ugu geysto, ama isku dayo ama u niyeeysto inuu qof kale dhibaateeyo, isaga oo aan oggollaansho ka heysan. Gacan u qaadku waa dambi, xitaa haddii ayna dhibaato jir ahaan kusoo gaarin.

Gacan u qaadka waxaa ka mid noqon kara:

- Dharbaaxo
- Riixid
- Haraati
- Feerid
- Mindi gelin
- Ku tuurid shay dhaawici kara ama cabsiinaya

**Gacan qaadka gurigu** waa gacan qaadka dhexmara laba qof oo xiriir hoose ee saaxiibtinimo leh, iyadoo aan loo eegin jinsigooda, hanaankooda jinsi ama aqoonsigooda jinsi. Ma aha qasab in labadaas qof ay sharciyan isqabaan ama wada nool yihiin, inta ay yihiin ama ahaayeen laba qof oo xiriir saaxiibtinnimo lahaa. Gacan qaadka gurigu wuxu kasoo horjeedaa sharciga.

Qof kasta ayaa la xiriiri kara booliska si uu ugu wargeliyo inay suurtogal tahay inuu dhacay gacan qaad guriga- adiga, lammaanahaada, carruurtaada, ama markhaatiyaal kale sida saaxiibbo iyo deris.

**Ku xadgudubka galmada** waa fal galmo ama taabashada aadan raali ka ahayn. **Oggolaashaha**

macnihiisu waa in aad si xor ah ku heshiiseen ficilka galmada ama taabashada. Haddii aad ka qayb qaadato falalka galmada adiga oo aad u sakhraansan qamro ama doroogo dartood, ama haddii aad hurudid ama miyir lahayn, sharciga wuxuu sheegaya in aadan si xor ah u awoodi karin inaad wax oggolaato ama ha tiraahdo.

Ogolaanshaha waxaa la bixin karaa ficil ahaan ama eray ahaan. Qofka bilaabaya ficilka galmada ama taabashada waa inay qaadan talaabooyin macquul ah ee ku hubinayaan in qofka raali ka yahay iyo in kale.

Canada, lammaanahaaga waxa lagu eedeeyn karaa waxyeeleyn ugalmood, xataa haddii aad isqabtaan. Ku xadgudubka galmada waa dembi xitaa haddii ayna dhicin waxyeelyn. Ku xadgudubka galmada waxaa ka mid noqon kara:

- dhunkasho raali laga ahayn;
- taabashada Ujeeddo u galamood leh ee aan raali laga ahayn la rabin,
- u galmood khasab ah;
- inuu kugu khasbo sameyn falalka galmada isaga oo isticmaalaya hanjabaad ama isagoo oo dhahaya in haddii aadan sidaa sameyn, wax xun ayaa kugu dhici

Inta badan ku xadgudubka ugalmoodka waxaa sameeya qof u dhibbanuhu yaqaan. Haddii qofka aad xiriir saaxiibtinnimo ee hoose aad la leedahay u kugu khasbo inaad sameyso nooc kasta oo fal ugalmood ah adiga oo aan raali ka ahayn, taas waxay noqon kartaa xadgudub ugalmood.

**Dabagal** waa marka qofka aadan rabin inaad xiriir la yeelatid u sameeyo Waxyaabo ku naxdin gelinaya. Dabagalku waa dambi xitaa haddii qofkaas ku dabagalayaa usan dhibaato jireed kuu geysan. Dabagalku wuxuu kasoo horjeedaa sharciga waxaana loo yaqaan **handadaad dambi ah.** Qofka waxaa laga yaabaa inuu jabiyay sharciga haddii qofkaas ku dabagalayaa uu:

- markasta ku fiirsanayo oo u ku dabagalayo;
- kuu soo diro hadiyado aadan rabin;
- waxyeeleeyo ama halis geliyo hantidaada;
- kula soo xiriiro ama iskudayo inuu kula soo xiriiro, isaga oo og in aadan rabin in lagula soo xiriiro,
- kuu soo diro fariimo badan oo aadan rabin;
- kuu soo diro fariimo aadan rabin isaga oo soo marsiinaya dadka kale;
- ku hanjabaya inuu adiga ama qoyskaaga ama xayawaankaaga guriga kuu jooga waxyeeleynayo;
- sameeyaa wax kasta ee kor lagu soo shegay isaga oo isticmaalaya telefoonka, warqado ama qoraallada, internet-ka, ama qofka ahaan.

Haddii markasta qof dabagal kugu hayo, waa in aad sameysataa qoral caddeynaya waxyaabaha naxdinta kuu keenaya ee qofkaas ku dabagalayaa u sammeeyo, iyo goorta iyo halka ay arrintaas ka dhacday. Qoraaladaas waxay kaa caawin karaan in aad ka dhaadhiciso booliiska iyo maxkamada in qofkaas dabasocodka ah u sharciga jabiyay.

## Sidee Sharcigu kuu Caawin Karaa

Adiga iyo carruurtaadu waxa suurogal ah inay khatar weyn idinka timaaddo qofkii xiriirku idiinka dhexeeyey mar alla marka xiriirkiinu burburo. Haddii aad ku fikireyso inaad ka tagtid qofka aad isqabtaan ama xiriirka leedihiin ee ku waxyeeleynaya, waxa jira tallabooyin ay tahay inaad qaadid ee kaa caawinaya inaad nabadgelyo heshid. Taas waxa ka mid ah inaad booliska la hadashid, ururada haweeenka ee xaafaddaada ama gabbaadyada haweenka iyo inaad sameysato qorshe badbaada. Waxaa kale oo jira siyaabo kale ee sharcigu kaa caawin karo, kaas oo ka mid noqon kara Qorshaha badbaadada.

## 1. Ka qaybgelinta Booliiska

Haddii cabsi iyo dareen amaan la'aan ah ku hayso, haddii lamaanahaagu gacan qaad ama hanjabay inuu ku waxyeeleynayo, ama lagu faraxumeeyey, waxaad wici kartaa booliiska si aad gargaar uga heshid. Ciidamada Booliska ee Canada ayaa baari doona oo soo oogi doona dembi haddii ay aaminsan yihiin inay jirto caddayn ku filan in dembi dhacay.

Qofka soo sheega in iyada ama isaga u yahay dhibbane dembi ku dhacay iyo qofka war rasmi usoo gudbiyey booliiska (inta badan loo yaqaan "soo gudbin cabasho") waxaa loo yaqaan "**dacwoode**." Qofka lagu soo oogay dembi (sidoo kale loo yaqaan dembi ah) waxaa loo yaqaan "**edeysane**."

## 2. Soo wargelinta waxyeeleynta lammaanaha aad xiriirka leedihiin

Marka ay booliisku yimaadaan goobta ay dhibaatadu lammaanaha xiriirku ka dhexeeya ay ka dhacday,

waa in ay eegaan xaaladda meeshaa markaas go'aan ka gaaraan in dagaal dhacay iyo in kale, iyo dhinaca garddarada iyo dagaalka ka mas'uulka ahaa. Haddii aad la hadlaysid booliska, waxaa muhiim ah in aad runta u sheegto.

Ontario, haddii boolisku rumaysan yihiin inay jirto caddayn in qofkaasi uu faraxumeeyey lammaanihiisa hadda ama mar hore, booliska waa inay soo oogaan dacwad dambi, xitaa haddii qofka la waxyeeleyey uusan isagu rabin. Arrintan waxaa loo yaqaannaa **Siyasadda Oogidda Dembi ee Qasabka ah**.

Haddii boliiska aamminsan yahay in qof haween ah ay waxyeeleyn u geysatay lamaanaheeda, waxaa laga yaabaa in iyada lagu soo oogay dembi. Mararka qaarkood, haddii ayna booliska u caddayn cidda garddarada ugu weyn geysatay, waxa laga yaabaa in laba qofba dembi lagu soo oogo. Tan waxaa loo yaqaannaa **dembi oogis labada dhinacba**.

Ontario waxay leedahay barnaamij maxkamad u gaar ah ee lagu dhegeysto waxyeeleynta Qoyska ee ka dhacda guriga, loona yaqaan **Maxkamadda Waxyeeleynta Qoyska**. Qareenka dawladda, ee loo yaqaan **U doodaha Dawladda**, iyo shaqaalaha kale ee maxkamaddu waxay leeyihiin tababar gaar ah si ay u fahmaan waxyeeleynta ka dhex dhacda laba qof ee xiriirka hoose ee saxiibtinnimo ka dhexeeyo.

Maxkamadda Waxyeeleynta Qoyska dembiyada horyaal waxay dhegeysataa siyaabo kale duwan, haddii ay tahay dembi ugu horeysay, in hub la isticmaaley ama dhaawac halis ah jirka. Haddii qofka xadgudubka geystay u qirtay inuu waxyeleynta geystay markaasna u ka qayb qaato latalin inuu

fahmo oo u joojoyo waxyeeleynta xadgudubka ee lamaanihiisa, waxaa laga yaabaa inay faylka u gasho inuu dembile yahay. Barnaamijkaas la talinta waxa loo yaqaan **Barnaamijka Gurmadka Waxyeeleynta Lamaanaha** (**PAR**). Haddii eedaysanahu udhameysan waayo barnaamijka PAR, iyo xaaladaha kale ee ka sii weyn, u Doodaha Dawladdu wuxuu ku weydiin doonaa in la sameeyo dhegeysi maxkamadeed.

## 3. Barnaamijka Gargaarka Dhibbanaha/ Markhaatiga (V / WAP)

Haddii dembi lagu soo oogay qofkii ku xadgudubka kugu sameeyey Barnaamijka Gargaarka Dhibbanaha/ Markhaatiga (V/W) ee Ontario, wuxuu taageeri karaa dhibbanayaasha iyo markhaatiyada waxyeeleynta guriga, faraxumaynta galmada iyo hanjabaadda dambiga ah (dabagalka).

Adeeg bixiyaasha V / WAP waxay bixiyaan macluumaad tallaabo kasta inta ay socoto maxkamaddu iyo inay kaa caawin karaan inaad isu diyaariso markhaati fur haddii ay noqoto in dacwadaada la geeyo maxkamad. Shaqaalaha ayaa sidoo kale kuu diyaarin karaan turjubaano iyo inay kaa caawiyaan inaad hesho khayraadka bulshada si aad u heshid taageero. Si aad u hesho barnaamij meesha aad degan tahay, wac **Khadka Taageerada Dhibanaha** ee:

**416-314-2447** (Toronto)
**1-888-579-2888** (tel. lacag la'aanta)

## 4. La Soco Shuruudaha Sii Deynta ama Damaanadda ee Qofka Ku Waxyeeleyey

Haddii qofka waxyeeleynta kuu geystay la qabtay oo lagu eedeeyay waxyeeleyn qoyska, faraxumaynta

galmada ama hanjabaad dambiga ah (dabagalka), booliiska ayaa laga yaabaa inay eedeysanaha kusoo daayaan iyaga oo shuruudo ku xiraya, ama eedeysanaha ay xabsiga ku hayaan inta **Dhegeysiga dammaanddiisa** la qabanayo. **Dammaanaddu** waa siideyn qofka si ku meelgaar ah inta laga gaarayo xukunka. Dhageysiga Damaanada, maxkamaddu waxay go'aamin doontaa in xabsiga lagu sii hayo eedeysanaha ama bulshada lagu sii daayo isaga oo dammiin haysta, ilaa maxkamaddu dhamaado.

Eedeysanaha lagu sii dayey bulshada isaga oo haysta damaanad ilaa iyo inta ay dacwaddiisu meel u dhacayso, laakiin waxa lagu xiri doonaa shuruudo, oo waxaa laga yaabaa inuu fuliyo qodobbo adag. Kuwaas oo loo yaqaan **Shuruudaha Si Deynta** ama **Shuruudaha Damaanadda**. Shuruudaha qaarkood ee inta badan eedeysanaha lagu amray inuu raaco waa:

- Waa inuu ka fogaado dhibbanaha (ama ka fogaado haddii usan dhibanaha raali ka ahayn inaad la xiriirto
- Kulama hadli karo dhibbanaha telefoonka, qoraalka, email, farriin dirid lasoo marsiiyo dad kale ama siyaabo kale ee la xiriirid.;
- Waa inuu ku sugnaadaa guriga waqtiga loo cayiman (ee loo yaqaan "bandow");
- Waa in aanu isticmaalin qamro ama daroogo,
- Waa in aanu lahayn ama haysan hub;
- Waa inuu helaa meel kale oo ku noolaado.

Shuruudaha damaanaddu sidoo kale waxay xadidi karaan xiriir ka dhexeeya eedeysanaha caruurtiisa ama caruurteeda.

Haddii aad cabsi ka qabtid eedeyanaha, waxaad u sheegi kartaa booliiska, shaqaalaha taagyeerada Dhibbanaha/Markhatiga, Wakiilka Dawladda (qareenka dawlada), ama garsooraha. Maxkamadda ayaa caddeyn karta xaaladaha faahfaahsan oo ku saabsan eedaysanaha, ama amar ku bixin karta in eedaysanaha xabsiga la geeyo ilaa dhamaadka maxkamadda.

***a) Muddo intee le'eg ayey jirayaan shuruudaha loo qabtay eedeysanaha?***

Inta badan, Maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa in Shuruudaha Siideytu ay jiri doonaan ilaa maxkamadda dembiyada ay soo gabagabeyso dhammaan edeymihii hor yaalay.Haddii maxkamadda ay wax ka beddeleyso shuruudaha ka hor inta usan xukunku dhicin waxay u badan tahay, waa in marka hore lagu soo ogeysiiyo. Haddii aad qabtid su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan wax ka beddelka shuruudaha amarka ee qofkii ku waxyeleyey, waa inaad u sheegtaa booliiska ama /Shaqaalaha barnaamijka Taagyeerada Dhibbanaha ama Wakiilka Dawladda.

***b) Maxaa dhacaya haddii shuruudahaas ay khilaafsan yihiin amar hore ee ka soo baxay Maxkamadda Qoyska?***

Waa wax iska caadi ah in Maxkamadda Dambiyada aysan waxba kala socon kiiska Maxkamadda Qoyska ama amarada maxkamadda qoyska. Maxkamadda Qoyska ayaa laga yaabaa inay ku amartay in waalidka kale u xaq u leeyahay in uu waqti la qaato carruurta. Kiiska dembiyada, Shuruudha Si Deynta maxkamaddu waxay oran kartaa in waalidka kale ee eedeysanaha ah usan oran karin in eedaysanaha waalidka kale usan adiga iyo carruurta kasoo ag dhawaan. Marka

ay arrintan oo kale dhacdo, way adag tahay in la ogaado wixii la sameyn lahaa. Waxaa muhiim ah inaad u sheegto Maxkamada Qoyska iyo Maxkamadda Dambiyada labadaba wixii ku saabsan labada xaaladood. kiiska dembiyada, waxaad u sheegi kartaa shaqaalahaTaagyeerada Dhibbanaha /Markhaatiga, Wakiilka Dawladda ama garsooraha wixii amarro ka soo Maxkamadda Qoyska. Waxa kale oo aad isku daydaa inaad hesho talo sharci sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah si ay kaaga caawiyaan xal u helidda.

***c) Qof kale ma ilaalin karaa eedaysanaha dacwaddiisa maxkamadda inta aan la gaarin?***

Maxkamadda ayaa sidoo kale laga yaabaa inay go'aansato in qof kale inuu ilaaliyo waxa eedeysanahu sameynayo marka isaga ama iyada la sii daayo ka hor inta usan xukunku dhicin. Qofkani waxaa loo yaqaan **Damiinte** oo inta badan ah qof eedeysanuhu yaqaan. Damiintaha waxaa laga yaabaa in ay ballanqaadaan inay bixiyaan deebaajiga lacagta ah ka hor inta eedaysanaha la sii daynin. Dammiinku waa inuu la socodsiiyaa booliska haddii eedeysanu u jabiyo mid ka mid Shuruudihii Sideynta. Haddii aad og tahay qofkii ku waxyeeleyey inuu jebiyey mid ka mid ah shuruudaha, waa inaad u sheegtaa booliiska ama shaqaalaha Taagyeerada Dhibbanaha / Markhaatiga ama Wakiilka Dawladda, ma aha qasab inaad u sheegto dammiinkiisa.

***d) Maxaa dhacaya haddii edeysanuhu u hoggaansami waayo Shuruudaha Si Deynta?***

Haddii aad cabsi ka qabtid in eedeysanaha laga yaabaa inuu qorsheynayo inuu dhibaato kuu geysto, u sheeg boliiska isla markiiba. Haddii eedeeysnuhu u damaanad ku joogo ee u jebiyo Shuruudihii Si Deynta, waxay la mid tahay iyada oo la jebiyey

Amarkii Maxkamadda, markaas isaga ama iyada waxaa laga yaabaa in dembi cusub lagu soo oogo.

Maxkamadda ayaa go'aan ka gaari karta in qofka eedeysanaha ah ee si joogto ah u jebiya Shuruudihii Si Deynta in loo ogolaado inuu bulshada kusii dhexjiro inta aan maalinta maxkamadda la gaarin. Oggolaanshii sii deynta waa lagala noqon karaa markaas waa la xirayaa oo xabsiga ayaa lagu haynayaa inta laga gaarayo maalintii maxkamadda.

***e) Maxaa Dhacaya xukunka ka dib?***

Haddii eedaysanaha lagu helo in uusan dembi lahayn, qofkaas xor buu u yahay inuu ku soo laabto bulshada shuruud la'aan. Haddii eedaysanaha lagu helo dambiga, Maxkamadda waxay amri kartaa xukunno kala duwan, taas oo ku xiran heerka dembiga. Qofka lagu helay dembi culus waxaa loo aqoonsanayaa inuu yahay "Dembile". Si aad u ogaato waxa dhici doona ka dib marka xukunku dhaco, waa in aad la xiriirtaa Shaqaalaha Taagyeerada Dhibbanaha / Markhaatiga ama Wakiilka Dawladda.

## 5. Raadsashada Amar Maxkamadeed in Qofka ku waxyeeleyey kasoo ag dhawaan

Haddii lagu weeraray, hanjabay, dabagalay ama qof ku cabsi gelinayo, Maxkamadda ayaa amar ku bixin karta in qofkaas u meel fog kaa joogo oo kaasoo ag dhawaan, haddii aad haysato sabab cad oo baqdin ah in qofkaas uu adiga ama carruurtaada waxyeeli doono. **Waxaa muhiim ah in ay leeyihiin qorshe suga ammaanka iyo sidoo kale Amar Maxkamaddeed**. Waxaad weydiisan kartaa hoyga badbaadada haweenka ama ururka dumarka inay kaa caawiyaan Qorshaha ammaanka. Laba nooc oo ah

amarada maxkamadda ee aad codsan kartid waxay ku sharaxan hoose.

**i) Ballanqaad Nabadeed – ee Maxkamadda Dembiyada**

Haddii aad ka baqayso in qof u adiga, wehelkaaga, ama ilmahaaga dhaawici doonaa, ama dhibaato u geysanaya hantidaada, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho Ballanqaad Nabadeed. **Ballanqaad Nabadeed** waxaa sidoo kale lagu magacaabaa "**dammiin ama Dareensi inay ilaaliyaan nabadda**". Waa Amar Maxkamadda Dambiyada ah inay xad u yeesho waxa qofka wax ku yeeleeyey u samayn karo, Amarna ku bixin karto in qofka wax ku yeeleeyey usan xiriir la yeelan karin adiga, qoyskaaga iyo hantidaada. Ma aha qasab in qofka aad ka baqaysaa u yahay mid dembi lagu soo oogay ama xukun ku dhacay. Ballanqaad nabadeed ma aha dembi, laakiin waa dambi haddii xadgudbuhu uusan raacin oo fulin Ballanqaadka nabadeed.

***a) Muddo Intee in le'eg ayaa Ballanqaadka Nabaddu socon?***

Ballanqaadka Nabadda waxaa la dalban karaa ilaa hal sano. Haddii xadgudbuhu uusan fulin Ballanqaadka Nabadda, ama haddii ay jiraan weli waa sabab cad ee baqdin keenaya, waxaad codsan kartaa Ballanqaadka Nabaddu in ay sii jirto muddo dheer.

***b) Sidee ayaan ku heli Bond Peace a?***

Si aad u hesho Ballabqaadka Nabadda, u tag booliska ama maxkamadda Deegaankaaga markaas codso inaad la hadasho **Nabad Ilaaliyaha (JP)**. Faa'iidada ku jirta inaad booliska marka hore la hadashi waxaa weeye booliisku waxay haystaan macluumaadka

(usan JP haysan) ee ku saabsan dembiyadii hore ee qofkaas galay.

Waxaa muhiim ah inaad ogaato in Maxkamaddu u sheegi doonto qofkii kugu xadgudbay inaad weyddiisatay, Ballanqaad Nabadeed. **Waa in aad ogaato inaad maxkamadda wada imaneysaan adiga iyo ku xadgudbuhu**, si aad u hesho Ballanqaad Nabadeed.

Maxkamada, waxaa loo baahnan doona inaad dharatid ee aad runta sheegeysid, ka dibna u sheegto JP ah sababta aad uga baqeyso xadgudbaha, iyo waxa xaddidaad ee aad rabto in xadgudbaha lagu sameeyo si aad dareen ammaan u heshid. Xadgudbuhu wuu aqbali karaa shuruudaha Ballanqaadka Nabadda, ama wuu ka doodi karaa.

Haddii JP uu ogolaado inay jirto sabab cabsi in wax lagu yeelo, lammaanahaaga, ilmahaaga ama hantidaada, JP wuxu sameyn karaa:

- Amar ku bixiyo Ballanqaad Nabadeed kaas oo u ku xaddidayo ilaa inta nabadgelyadaadu sugan tahay.
- Amar ku bixiyo ku xadgudbaha inuu saxiixo Ballanqaadka Nabadeed; iyo,
- Haddii xadgudbuhu u saxiixi waayo, in markaas u amar ku bixiyo in xadgudbaha xabsiga loo dhaadhiciyo hal sano ah.

Waxaa muhiim ah in aad geyso Ballanqaad Nabadeed saldhiga booliska ah oo codso inay ka diiwaan geliyaan faylka **Xarunta Macluumadka ee Booliska Canada Police (CPIC)**. Markaas boolisku waxay ka hubin karaan CPIC inaad haysato Ballanqaad Nabadeed, iyo in xadgudbuhu uusan ku raacin xadkii lagu amray.

**Waa in aad ogaato in JP u diidi karo codsigaaga Ballanqaadka Nabadda, ama u dalban karo Ballanqaad Nabadda ee adiga lid kugu ah idiinka, ama adiga iyo xadgudbaha labadiinababa.**
Haddii Maxkamadda ku tiraahdo waa inaad saxiixdaa Ballanqaadka Nabadeed, codso inaad la hadasho qareen marka hore, si aad u hubiso in aad fahamsan tahay waxa aad sameyn karto iyo aadan samayn karin.

### ii) Amarada xannibaadda – ee Maxkamadda Qoyska

Dhawritaanka amarka waa mid aad u badan sida Ballanqaad Nabadeed, laakiin si gaar ah waxaa loogu talagalay xaaladaha xadgudubka qoyska ama rabshadaha. **Dhawritaanka amarka** waa Amarka aad ka heli kartaa Maxkamadda Qoyska, haddii aad haysato sabab wanaagsan oo aad cabsi ka qabtid amnigaaga ama ammaanka ee carruurtaada. Waxaad codsan kartaa amarka ah dhawritaanka qof aad tahay ama waxay wada guursadeen ama lammaane aad tahay ama la nooshahay, xataa haddii aad kaliya u wada nooleydeen muddo gaaban. Haddii aad hore u leedahay kiis ee Maxkamadda Qoyska, waxaad weydiisan kartaa in dhawritaanka amarka ee codsigaaga ah. Waxaad kaloo weydiin kartaa dhawritaanka amarka oo aan haysan wax sharci kale ee qoyska ama kiiska dembiyada.

#### *a) Intee in le'eg ayaa Amarada xannibaaddu socon doonaa?*

Maxkamadda waxay amri kartaa in ballanqaadka nabaddu socon doono muddo gaarka ah ee waqtiga ama weligeedba. Waxay noqon kartaa, hadba inta ay Maxkamadda u aragto inay lagama maarmaan tahay in aad amaan tahay.

***b) Sidee ayaan ku heli dhawritaanka amarka?***
Si aad u dalbato dhawritaanka amarka ee Ontario ah, waa inaad tagtaa Maxkamadda Qoyska oo buuxi foomka codsiga. Waxaa jira qareenno, ardayda sharciga iyo shaqaalaha maxkamadda ee maxkamadaha badidood oo kaa caawin kara foomka.

Waxaad codsan kartaa in dhawritaanka amarka keligeed, ama qayb ka mid ah kiiskaaga Maxkamadda Qoyska la qabashada arrimo kale, sida haynta ilmaha, taageero ilmo, masruufka xaaska ama furriin. Sida caadiga ah, adiga iyo xadgudbaha labadiinuba waxay noqon doontaa inaad maxkamadda in la oggolaado ama aan la oggolaan in aad hesho dhawritaanka amarka. Waxay qaadan kartaa dhowr bilood si aad u hesho dhawritaanka amarka sababtoo ah Maxkamadaha Qoyska aad ayey u mashquul yihiin.

***c) xaaladaha degdegga ah***
Xaaladaha degdegga ah, waxaad codsan kartaa **amarka ka celinaya degdeg ah**. Waxaad kaloo weydiin kartaa Maxkamadda dhawritaanka amarka oo aan marka hore u sheegay xadgudbaha. Tan waxa loo yaqaan oo ah **"degdegga hore"** ee amarka. Maxkamaddu waxay oggolaan kartaa in ay amarto in dhawritaanka kuwaas oo muddo gaaban, ilaa xadgudbaha uu ka helo fursad uu kaga jawaabo ka dibna maxkamada go'aan kama dambays ah ka gaarto. Xeerarka Amarada degdegga ah oo hore waa adag yahay oo waa fikrad wanaagsan inaad weydiiso qareen caawimaad.

**iii) Marka aad qabtid Ballanqaad Nabadeed ama ilaalinta Amarka nabadgelyada ah - maxa la sameeya haddii xaalad deg deg ah timaaddo.**

Marka aad leedahay Ballanqaad Nabadeed ama dhawritaanka Amar, waa in aad nuqul ka mid ah haysataa.

Ilaa xad Maxkamadda waxay amri kartaa in Ballanqaad ama dhawritaanka Amarka Nabadda waxay noqon kartaa sida xadka ee Xaaladaha Damaanadda Si Deynta, sida:

- Wax xiriir ah aan la yeelan adiga ama qoyskaaga, sinaba
- Iska yimaada, gurigaaga, goobta shaqada, dugsiga
- Haysan hub

Haddii xadgudbaha uusan raacin qayb ka mid ah Amarka Maxkamadda, waxaad wici kartaa booliiska oo waxaad ka warbixisaa jebinta Ballanqaadkii Nabadda ama dhawritaanka Amarka, Boolisku waa ay soo xiri karaan kana qaadaan karaan talaabo qofka jebiya Ballanqaadka Nabadda ama dhawritaanka Amarka, taas oo dembi ah.

## 6. Dambiyada Dhaawacyada Guddiga Magdhowga

Guddiga Magdhowga Dhaawacyada Dembiyada waa hay'ad go'aan qaadasho leh in lacag la siiyo dhibanayaasha qaarkood ee dhibaato kasoo gaartay dembi rabshad, oo ay ka mid yihiin weerar guriga, faraxumaynta galmada iyo dabagalka, si ay uga caawiyaan iyaga saamaynta dembiga. Saamaynta waxay noqon kartaa mid jidheed ama nafsadeed, oo waa inuu ahaado mid cadaaladdarro ah oo halis ah. Waxaad samayn kartaa dalab la xiriir Guddoonka xitaa haddii xadgudbaha la qabto ama lagu helo dambi.

Guddiga waxaa laga yaabaa in aad ka heshid abaal marin lacag haddii dembigu sabab u ahaa inuu keeno:

- In lagaa bixiyo adeegyada daaweynta ama la-talin caafimaad;
- In lagaa bixiyo safarka si aad u hesho daaweyn ama la-talin,
- Dakhli lumista;
- Xanuun iyo dhibaato.

Waxaad codsan kartaa in Guddiga adiga oo buuxinaya foomka codsiga, online ama qoraal. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Guddiga ee **www.cicb.gov.on.ca** ama telefoonka:

**416-326-2900** (Toronto)
**1-800-372-7463** (tel.lacag la'aanta ah)

Fikradaha halkan lagu muujiyey qoraaladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha Gobolka.

Inkastoo ay qoraaladan taageero dhaqaale ka heleen Uruka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan kama tarjumeyso aragtida Ururka .

**Waxaa jira halis weyn oo gacan ka hadal ah markii xiriir kalgacal ah u burburo. Haddii aad ku sugan tahay khatar degdeg ah, wac 911. Haddii adiga ama qof aad taqaan u halis ku jiro, booqo bogga FLEW website wixii macluumaad ah ee ku saabsan helitaanka taageero.**

**Haddii aad tahay qof dumar ah ee fransiiska ku hadla oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad heshid adeegyada luuqadda Faransiiska marka ay socoto maxkamadda xeerka qoyska. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir qareen, Xarumaha sharciga ee bulshada, ama khadka taageerada Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.**

**Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd adeegyada Faransiiska boggayaga internetka www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.**

## Mawduucyada Xeerka Qoyska ee la heli karo*

1. Waxyaabaha kala duwan ee Xallinta Khilaafaadka iyo Xeerka iyo Qoyska (ENG 001)
2. Sharciga Badbaada Carruurta iyo Qoyska (ENG 002)
3. Masruufka Caruurta (ENG 003)
4. **Sharciga qoyska iyo kan Dambiyada (ENG 004)**
5. Xannaanaynta iyo Booqashada Caruurta (ENG 005)
6. Heshiisyada Qoyska (ENG 006)
7. Waan-waanta Xeerka Qoyska (ENG 007)
8. Xeerka Qoyska sida kuwa soo haajiray, qaxootiga iyo Haweenka Sharciga Lahayn (ENG 008)
9. Helitaanka macaawinta ee dhibaatooyinkaaka xeerka qoyska (ENG 009)
10. Sida loo Qaybiyo Hantida ee Xeerka Qoyska (ENG 010)
11. Guurka iyo furidda (ENG 011)
12. Taagyerada xaaska (ENG 012)

* *Buugyarahan waxaa la heli karaa isaga oo qaabab iyo luuqado kala duwan. Fadlan fiiri www.onefamilylaw.ca wixii macluumaad dheeraad ah. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qoraallo dheeraad ah bogga internetka ee kaa caawinaya in aad fahamto xuquuqdaada qoran xeerka qoyska .*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by: / Financé par : Ontario

Fikradaha lagu muujiyey qoraaladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha maalgaliyayaasha.